عيد مبارك

تقبل الله منا ومنكم

يسعدنا في **لجنة أفريقيا للإغاثة ومجمع الكويت التعليمي**
أن نتقدم إليكم بأسمى آيات التهاني والتبريكات
**بحلول عيد الفطر المبارك 1443 هـ**
سائلين المولى -عز وجل- أن يعيده علينا وعليكم أعواماً عديدة
وأزمنة مديدة والأمة العربية والإسلامية في عز ورخاء وتمكين.

كل عام وأنتم بخير


# مسارات خيرية CHARITABLE PATHS

لجنة أفريقيا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE
أثـرٌ .. يبقى

جمعية الرحمة العالمية
Rahma International Society

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(4PAGE) WED ,2 April 2022 Shawwal 1443 Hargeisa-Somaliland


## Dad Ka Badan 35 Kun Ayaa Ka Faa'idastay Mashaariicda Ramadaanta

## Burco Kun Qof Ayaa Ka Faa'idaystay Ololeyaal Caafimaad Oo Bilaash Ah

## Afur Wadareed Ay Ka Qaybgaleen Masuuliyiin Ka Socota ALRAXMA-Usteri

## Ceel-Riig Ay Ka Faa'idaysanayaan 3 Kun Oo Qof Ayaa Xadhiga Laga Jaray





## Waaxda Warbaahinta Ee ARC Oo Bixisay Abaalmarintii Sannadkii 2021

كل عام وأنتم بخير

# Dad Ka Badan 24 Kun Ayaa Ka Faa'idastay Mashaariicda Ramadaanta



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa qoysas sabool ah u qaybisay 3,978 xidhmo oo ahaa raashin isugu jira kiish sonkor ah, kiish daqiiq, kiish bariis ah, caagad saliid ah, Timir, Shaah iyo Tamaandho qasaac. Mashruucan oo ka mid ahaa mashaariicda samafal ee ay ARC ugu talagashay bisha soon, waxa ay la bilowdeen curashadii bisha barakaysan ee 1443 H, waxa aanay u qaybisay sida ka muuqata shaxda hoose:

| Goobta lagu qaybiyey | Tirada xidhmooyinka raashinka |
|---|---|
| Hargeysa | 1486 xidhmo |
| Boorama | 483 xidhmo |
| Burco | 255 xidhmo |
| Laascaanood | 255 xidhmo |
| Buhoodle | 255xidhmo |
| Garoowe | 17 xidhmo |
| Muqadisho | 982 xidhmo |
| Jigjiga | 130 xidhmo |
| Goobo gaar ah (Masaajid iyo xarumo Islaamiya) | 115 xidhmo |




Dhinaca kalana magaalada Hargeysa waxa ay ARC afur iyo casho ugu samaysay 5000 oo qof oo ay ka mid yihiin halwadeennada gurmadka degdegga ah iyo ciidamada amniga ee ka shaqaynayey suuqa Waaheen ee dhowaan gubtay. Mashruucan samafal waxa kale oo ka mid ahaa 767 Afur iyo Casho dhammaystiran ah oo ay ARC u samaysay qoysaska danyarta ah ee magaalooyinka Burco, Garoowe, Jigjiga iyo Muqdisho. Guud ahaan mashaariicdan waxaa ka faa'idaystay dad tiradoodu ka badan tahay 104 kun iyo 767 qof oo deggen deegaannadaas kala duwan ee Soomaalida.

## Ceel-Riig Ay Ka Faa'idaysanayaan 3 Kun Oo Qof Ayaa Xadhiga Laga Jaray



Hay'adda ARC ayaa xadhiga ka jartay ceel-riig ay ka hirgelisay deegaanka Xilimaale ee degmada Boon, gobalka Awdal. Ceelkan oo jooggiisu dhanyahay 40 mitir, waxaa ku rakiban qalabka biyo soosaarka oo ku shaqaynaya tamarta qorraxda (Solar) iyo barkad muggeedu dhan yahay 30 kun oo litir. Waxa kale oo raacsan darar bakteeriyada ka dhowrsoon oo dadku ay ka cabbi karaan iyo kuwo loogu talagalay waraabka Xoolaha. Mashruucan oo ay ka faa'idaysanayaan 3 kun oo muwaadin waxaa maalgelisay hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt, waxa aanu qayb ka yahay mashaariicda samafal ee ay hay'ada ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

## ARC Oo Hirgelisay Masaajid Qaadaya In Ka Badan Kun Qof



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay saddex Masaajid oo ay ka hirgelisay magaalooyinka Hargeysa, Somaliland iyo Muqdisho, Soomaaliya. Dhismaha masaajidadan ayaa qayb ka ah qorshaha samafal ee ha'adda iyo dadaalka ay ku doonayso in xarumaha cibaadada la gaadhsiiso deegaannada aanay ka jirin. Magaalada Hargeysa waxa laga dhisay labada Masaajid ee 'Raadiya Shiyaal iyo Badar Saalim, halka Koonfurta magaalada Muqdisho laga dhisay masaajidka Abu Bakar A-Siddiiq. Masaajidadan ayaa ku fadhiya dhul cabbirkiisu dhanyahay 200 – 450 mitir oo laba jibbaaran, waxaana dhismahooda ku lammaan gogoshii, cod-baahiyeyaashii, goobihii weysada iyo suuliyadii, iyo guud ahaan goobihii adeeg Masaajid logu baahnaa.

## Qoysas Danyar Ah Oo La Siiyey Lo' Irmaan



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa laba neef oo lammaan ku wareejisay qoysas sabool ah oo deggen magaalada Jowhar ee xarunta dawlad gobaleedka Hirshabeelle. Labadan qoys ayaa mid kasta la guddoonsiiyey neef lo' ah oo lammaan, kaas oo loogu talagalay in ay ka faa'idaystaan iibka caanaha iyo subagga, si ay ugala soo baxaan baahiyaha aasaasiga ah ee noloshooda. Mashruucan ay ARC lo'da irmaan ku siinayso qoysaska Saboolka ah, waxa uu ka mid yahay mashaariicda kobcinta iyo Horumarinta dhaqaale ee ay deegaanno badan ka fuliso, kawaas oo ujeedadoodu tahay in qofka laga saaro marxaladda ku tiirsanaanta, lana gaadhsiiyo marxalad waxsoosaar oo uu isagu kaalin ku yeesho dhaqaalaha guud ee bulshadiisa.

## Burco Kun Qof Ayaa Ka Faa'idaystay Ololeyaal Caafimaad Oo Bilaash Ah



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo kaashanaysa cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo hoos yimaadda, ayaa laba olole oo caafimaad ka fulisay magaalada Burco ee gobalka Togdheer. Kooxo caafimaad oo ka kooban takhasusyada Carruurta, Xanuunnada uur ku jirta, qalliinka Lafaha iyo Haweenka iyo Dhalmada ayaa adeegyo caafimaad oo lacag la'aan ah ka fuliyey xarunta waxbarashada ee Alxannaan oo ku taalla magaalada Burco iyo xaafadda 18 ka May ee magaaladaas.



Kolonyada dhakhaatiirta ah ayaa muddadii labada maalmood ahayd ee ay ololahan ku dhexjireen, waxa ay baadhitaanno ku sameeyeen dad ka badan kun qof oo isugu jiray carruur, haween iyo dad waayeel ah, kuwaas oo loo sameeyey shaybaadhadii xaaladdooda la xidhiidhay, isla markaana bilaash lagu siiyey dawooyinka ay u baahnayd xaaladahooda caafimaad.Ololeyaashan caafimaad waxa ay qayb ka yihiin gurmad ay hay'adda Gargaarka Afrika wadday tan iyo bilowgii bishii Shacbaan ee 1443 H, kaas oo ay maalgelintiisa iyo kormeerkiisaba lahayd hay'adda 'Jimciyatu tanmiyat Alkhayriya oo fadhigeedu yahay dalka Kuweyt. Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa si joogto ah Mashaariic caafimaad oo noocan ah uga fulisay deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.




## Dad Ka Badan 35 Kun Oo Ka Faa'idaystay Gurmadka Abaaraha Ee ARC


Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa magaalooyinka Hargeisa, Muqdisho, iyo Garoowe ka fulisay olole gargaar oo ay kaga qaybqaadanaysay gurmadka, dadka dhibaatadu ka soo gaadhay abaaraha ka jira deegaananda kala duwan ee Soomaalida.
Mashruucan oo ay maalgelintiisa iyo kormeerkiisaba lahayd hay'adda samafalka ee 'Jimciyatu tanmiya Alkhayriya' oo fadhigeedu yahay dalka Kuweyt, ayaa qaybisay raashin ka kooban dhammaan noocyada cunto ee muhiimka ah, sida bariiska, daqiiqda, sonkorta, saliidda, timirta oo ku filan 5,160 qof oo sabool ah iyo 120 booyadood oo biyo cabbitaana ah. Guud ahaan mashaariicdan waxaa ka faa'idaystay dad ka badan 35 kun oo qof, oo faahfaahinta deegaannadoodu shaxda hoose ka muuqato.

| Goobta Mashruuca | Faafaahin | Tirada |
|---|---|---|
| Hargeisa | Raashin | 400 xidhmo |
| | Booyado biyo ah | 60 booyadood |
| Muqdisho | Raashin | 330 xidhmo |
| | Booyado biyo ah | 40 booyadood |
| Garoowe | Raashin | 130 xidhmo |
| | Booyado biyo ah | 20 booyadood |

Hay'adda Gargaarka Afrika ayaa bilihii u dambeeyey ka qaybqaadanaysay ololeyaasha gurmadka lagu gaadhsiinayo dadka dhibaatooyinka nololeed ka soo gaadheen abaaraha ba'an ee ku dhuftay deegaanno kala duwan oo ka mid ah Soomaaliya iyo Somaliland.







## Qalliino Faruurta Loogu Xidhayo Carruur Ku Nool Deegaanno Kala Duwan



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa magaalada Muqdisho ka fulisay qalliino faruurta loogu xidhayo carruur kala duwan oo ku dhaqan magaalooyinka, Muqdisho Soomaaliya iyo Hargeysa Somaliland. 7 carruur faruuran ah oo ku nool magaalada Muqdisho ayaa qalliinkan looga faa'ideeyey, sida oo kale cisbitalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo ARC hoostaga ayaa sameeyey qalliino oo makaanka dib loogu celinayo 50 ka mid ah haween ka soo jeeda qoysas saboola ah oo uu ilma-galeenku ka soo dhacay. Qalliinada oo dhammaantood guulaystay waxa ay qayb ka yihiin mashaariicda caafimaad ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, kuwaas oo ujeedadoodu tahay in jawaab degdeg ah la siiyo guud ahaan bukaanka ka soo jeeda qoysaska danyarta ah, gaar ahaan kuwa xaaladaha culus ee aan awoodin in ay iska bixiyaan kharashaadka caafimaadka.

## Hablaha Ardayda Kuweytiga Oo Ka Qaybqaatay Gurmadka Abaaraha




Hablaha wax ka bartay xarunta waxbarashada Kuweytiga ee magaalada Hargeysa ayaa nususaacahooda kaga qaybgalay ololaha gurmadka loogu fidinayo, dadka ay saamaynta xun ku yeesheen abaaraha ku dhuftay deegaannada kala duwan ee Somaliland.
Lacagta nususaacaha oo ay isu geeyeen ayaa bixisay kharashka afar booyadood oo biyo ah, kuwaas oo 40 kun oo litir oo biyo la cabbi karo ah gaadhsiiyey deegaannada abaartu biyo la'aanta ba'an ku keentay ee caasimadda Hargeysa. Tallaabadan ayaa qayb ka ah hawlo samafal iyo dhaqdhaqaaqyo qiimo leh oo ay ardayda xarunta waxbarashada Kuweytigu fuliyaan, iyaga oo ka jawaabaya Barbaarinta qiyamka fiican ee ay xarunta Kuweytigu ku ababiso ardayda, si kor loogu qaado dhaqanka ah in qofku wanaagga la doorbido walaalkii, in bulshadu isu naxariisato, iyo in quluubta ardayda wiilal iyo gabdhaba lagu beero dareenka isu damqashada bulshada iyo ka warhaynta dhibta qaybo ka mid ah bulshadu ay qabaan.

## Afur Wadareed Ay Ka Qaybgaleen Masuuliyiin Ka Socota ALRAXMA-Usteri



Galabnimadii Axadda 22 ka Soon, munaasabad afur iyo casho wadareed ah oo ka qabsoontay xarunta Kuweytiga ee Hargeysa ayaa kulmisay masuuliyiinta maamulka iyo hawlwadeennada waaxyaha iyo qaybaha kala duwan ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC. Munaasabaddan oo si weyn loo soo agaasimay, waxaa lagu beegay dhammaystirka mashaariicda Afurinta dadka sooman ee Saboolka ah oo ay hay'addu wadday tan iyo bilowgii bisha barakaysan. Waxaana hormuud ka ahaa masuuliyiin ka socota hay'adda ALRAXMA laanteeda Usteri oo casuumadda fidisay. Munaasabaddan waxaa qayb ka ahaa muxaadaro afurka ka hor uu jeediyey Sheekh Ismaaciil Cabdalbaari oo ka mid ah culimada waaweyn ee dalka Yemen, waxa aanu shaqaalaha hay'adda ku baraarujiyey anshax wanaagga mihnadda ee looga baahan yahay hawlwadeennada samafalka iyo muhiimadda ay leedahay in qofka muslimka ahi shaqada uu qabanayo uu dar Alle u qabto isaga oo ajar Alle kaga raadinaya. Taas oo kaalin ka qaadanaysa xoojinta adeegga bani'aadamnimo iyo samafal ee ay hay'adda ARC iyo hay'adaha kaalmeeyaa u qabtaan bulshada Soomaaliyeed.



ALRAXMA – Usteri waa laanta dalka Usteri ee hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA oo fadhigeedu yahay Kuweyt, waxa aanay muddooyinkii u dambeeyey hawlo samafal oo ay dhex marisay ARC ka fulisay magaalooyin kala duwan oo Somaliland iyo Soomaaliya ah.



## Waaxda Warbaahinta Ee ARC Oo Bixisay Abaalmarintii Sannadkii 2021

Waaxda warbaahinta ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa abaalmarin guddoonsiisay shakhsiga iskaashigii shaqo iyo la socoshadii dhinaca baahinaha ee ugu badnaa la sameeyey waaxda, sannadkii 2021. Abaalmarintan oo ahayd shahaado sharaf iyo talefan casri ah ayaa ay waaxdu ku maamuustay, Xamse Maxamuud Maxamed oo ka mid ah ardayda dugsiga sare ee xarunta Kuweytiga oo isagu noqday shakhsiga sannadka.
Maamulaha guud ee hay'adda ARC, mudane Cabdiraxmaan Almucallimi oo lagu sharfay in uu abaalmarinta guddoonsiiyo Xamse ayaa soo dhoweeyey fikirkan hawlwadeennada iyo ardayda sare ee xarumaha ARC lagu dhiirrigelinayo, iskaashiga iyo ka qaybqaadashada faafinta dhambaalka iyo sawirka wanaagsan ee hawlaha samafalka ah ee hay'addu waddo. Madaxa waaxda Warbaahinta ee ARC mudane Cabdallah Almuqaddam oo isaguna hadal kooban ka jeediyey munaasabadda ayaa arday Xamse ku ammaanay dadaalka uu isaga oo waxbarashadiisa wata, haddana mar kasta ugu jiro ka qaybqaadashada hawlaha warbaahineed ee xafiisku ka dhex wado xarunta iyo sii faafinta farriimaha ay waaxdu gaadhsiinayso bulshada. Waxaa isaguna munaasabadda ka hadlay madaxa xidhiidhka dadweynaha ee ARC, mudane Yuusuf Cabdalla oo shaqaalaha kula dardaarmay in ay hay'adda u noqdaan safiirro wanaajiya xidhiidhka ay la leedahay bulshada ay wax u qabanayso iyo muunad muujisa quruxda hawlaha samafal ee ay dadka u hayso.



Xamse waxa uu waaxda warbaahinta kala shaqeeyaa fududaynta hawlaha sawirqaadista, abaabulka munaasabadaha warbaahinta, dhiirrigelinta ardayda iyo sii faafinta wararka iyo farriimaha ay waaxdu dadweynaha gaadhsiiso.

# عيد سعيد

تقبل الله منّا ومنكم صالح الأعمال

AFRICAN RELIEF COMMITTEE

A.R.C

لجنة أفريقيا للإغاثة

مكتب الصومال

@africanreliefco

مسارات خيرية

CHARITABLE PATHS